

Warbixin ku saabsan iskuulka

Waxbarashada qasabka ah iyo waxbarashada ikhtiyaariga ah

Dhammaan carruurta da'doodu tahay lix ilaa lix iyo toban sannadood ku waas oo ka diiwaangashan Iswiidhan waxaa waajib ku ah waxbarashada iskuulka. Taas macnaheedu waxaa weeye in carruurta ay xaq u leeyihiin waxbarasho, laakiin sidoo kale waajib ku ah in ay joogaan waxbarashada iskuulka. Iskuulka qasabka ah ma quseeyso carruurtooda aan ka diiwaan gashanayn Iswiidhan. Carruurtani hase ahaatee waxay xaq u leeyihiin inay tagaan iskuulka haddii ay doonayaan.

Dhammaan carruurta waxay xaq u leeyihiin in ay meel ka helaan iskuulada hoose dhexe ee degmada Booskaasi waxaa weeye midka loo yaqaan iskuul-gurri iyadoo loo eegayo cinwaanka ilmuhu ka diiwaan gashanyahay.

Meelaynta iskuulka

Markuu ilmo jirro lix sano waxaa bilaabanaya waajibnimadii iskuulka. Ilmuhuna wuxuu si toos ah u heli doonaa meelaynta-iskuulka ee iskuulada hoose-dhexe ee degmada. Adiga oo ah qofka masuulka ka ah ilmaha waxaad dooran kartaa in aad ka raadsato boos iskuul kale, iskuul degmo ama mid madax bannaan midkood.

Dugsiga Sare

Si uu u helo in uu dhigto dugsiga sare, waxaa qasab ah in ilmahu uu bilaabo waxbarashada ka hor sanad dugsiyeedka dayrta sanadka isagu ama iyadu ay buuxineyso 18 jir. Si aad uga ogaato wax dheeraad ah oo ku saabsan waxbarashada dugsiga sare, waxaad la xiriiri kartaa la taliyaha dugsiga sare ee Sundsvall. Meesha lagala xiriirayo waxaad adigu kahelaysaa meesha ugu hooseysa ee warbixinta.

Haddii ilmahaagu aadi doono iskuulka

Adiga oo ah qofka masuulka ah waxaad samayn kartaa laba siyaabood oo kala duwan mid kood haddii aad rabto in ilmahaagu in ilmahaagu tagaan iskuulka. Waxaad adigu siineysaa oggolaanshahaaga hay'ada Socdaalka (magareeshinka) in ay u gudbiyaan macluumaadka ku saabsan ilmahaaga degmada. Ama waxaad adigu shakhsi ahaan la xiriiri kartaa degmada waxaadna u sheegi in aad rabto in ilmahaagu ay aadi doonaan iskuulka. Meesha lagala xiriirayo waxaad adigu kahelaysaa meesha ugu hooseysa Wixii kale oo macluumaad dheeraad ah ee degmada. Degmada Sundsvall waxaa jira dugsiyo hoose- dhexe iyo sare labadaba kuwo degmo iyo kuwo madax-bannaan. Warbixintata ku saabsan iskuulaadka degmada iyo kuwa madax-bannaan waxaa laga heli karaa bogga internetka ee degmada Sundsvall.

www.sundsvall.se. Macluumaadka waxaa lagu heli karaa oo kaliya luuqada iswiidhishka.

Iskuulaadka madaxbannaan waxaa weeyaan iskuulo kuwaas oo leh mas'uul kale (milkiile) aan ahayn degmada

Qeybta gaarka ah ee iskuulaadka madaxa-bannaan

Iskuulka madax banaan kaas oo leh safka iskuulka loo galo wuxuu lahaan karaa qeyb khaas ah. Qeybta khaaska ah macnaheedu waxaa weeyaan in ardayda degan iswiidhan in ka yar laba sano oo kaliya ka hor sanad dugsiiyeedka markaa jira ay yihiin kuwa ku jira qeybtaas.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qeybta khaaska ah ee dadka wadanka ku cusub waxaa laga heli karaa website-ka hay'ada qaranka ee kormeerka iskuulada www.skolinspektionen.se.

Badalashad iskuulka

Haddii adiga oo ah qofka masuulka ah aad rabto in aad beddesho iskuulka dadweynaha degmada ee ilmahaaga way suuroobi kartaa sanadka oo dhan. Waa suurto gal in la beddelo in ala inta aysan ku soo kordhin kharash iyo dhibaatooyin ururka degmada. Haddii aad bedesho iskuulka ilmahaaga taas macnaheedu waxay noqon kartaa in ilmahaagu ay waayi doonaan xaqa ay u leeyihiin gaadiidka iskuulka.

La xiriir maamulaha iskuulka aad rabto in ay ilmahaagu u baddashaan. Macluumaadka xiriirka iskuulada waxaad adigu ka heli kartaa www.sundsvall.se/grundskola/.

Akhri faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan iskuulada Iswiidhan:

Warbixin ku saabsan Iswiidhan: www.informationsverige.se (macluumaadka waxaa lagu heli karaa luuqado kala duduwan)

Iskuulka Iswiidha ee loogu talo galay dadka cusub: www.omsvenskaskolan.se (warbixinta waxaa lagu heli karaa luqado badan)

Wixii macluumaad dheeraad ah ee degmada, waxaad adigu kala xiriiri kartaa:

Maamulka xiriiriyaha xarunta barashada luuqadaha badan (CFL): 060-19 84 78

Wixii macluumaad ahee ku saabsan waxbarashada dugsiga sare waxaad adigu la xiriiri kartaa lataliyaha dugsiyada sare (adoo usii maraya telefoonka xiriirinta): 060-19 17 00